Trinity College Dublin
Coláiste na Tríonóide, Baile Átha Cliath
The University of Dublin

World Vision

HEARTS – Macluumaad ku saabsan Daraasadda Cilmi-baarista

Salaam!

Bulshadaada waxaa loo doortay inay ka qaybqaadato mashruuc cusub oo xiiso leh oo la yiraahdo “Bogsiin iyo Awoodsiin – Helitaanka Adkaysi iyada oo loo marayo Korriin Ruuxi ah”, sidoo kale loo yaqaan **HEARTS**.

HEARTSwaa barnaamij ku saabsan taageeridda caafimaadka maskaxda ee bulshadaada si waafaqsan waxbarista iyo dhaqamada Islaamka. HEARTS waxaa loo habeeyey in ay hoggaamiyaan xubnaha bulshada lafteedu, taas oo macnaheedu yahay in dadka reer Dangorayo la tababari doono si ay u hoggaamiyaan habka HEARTS una taageeraan dadka kale ee ku nool bulshadooda.

Iyadoo qayb ka ah HEARTS, waxaan sidoo kale sameynaynaa daraasad si aan u fahanno sida HEARTS u shaqeynayo iyo sida loo horumarin karo si uu si wanaagsan ugu adeego bulshadaada ama bulshooyinka kale ee Muslimiinta ah mustaqbalka. Qaybta daraasadda ee HEARTS waxaa hoggaaminaya Jaamacadda Trinity College Dublin, iyadoo kaashanaysa World Vision Ireland iyo World Vision Somalia.

Tani maxay adiga kuu tahay?

Waxaan kaa codsaneynaa inaad akhrido foomkan oo aad go'aansato haddii aad jeclaan lahayd inaad ka qayb qaadato daraasadda la xiriirta mashruuca HEARTS. Ka qayb qaadashada cilmi-baaristan waxay ka dhigan tahay in kooxda daraasadda ay:

- Inay kaa ururiyaan xog ku saabsan waayo-aragnimadaada ka qaybgalka barnaamijka HEARTS, oo ay ku jirto sida uu saameyn ugu yeeshay caafimaadkaaga maskaxeed iyo fayo-qabkaaga.

- nay xogtan u adeegsadaan barashada sida mashruucu u socdo iyo sida loo horumarin karo, si uu si wanaagsan ugu adeego bulshada mustaqbalka.

Waxyaabaha Muhiimka ah ee ay Tahay Inaad Ogaato

- Waxaan xogtaada isticmaali doonnaa oo keliya haddii aad oggolaato.

- Jawaabahaaga si qarsoodi ah oo ammaan ah ayaa loo ilaalin doonaa. Qof ka baxsan kooxda daraasadda ma ogaan doono jawaabaha aad bixisay.

- Waxaad joojin kartaa ka qaybgalka daraasadda wakhti kasta haddii aadan mar dambe doonayn inaad ka qaybqaadato. Wax cawaaqib xun ah kuma yeelan doonto haddii aad go'aansato inaad joojiso ka qaybgalka.

- Weli waxaad ka qayb geli kartaa mashruuca HEARTS xitaa haddii aadan doonayn inaad ka mid noqoto daraasadda.

Macluumaadka Ardayga	
Yaan nahay?	Waxaan nahay koox ka socota Jaamacadda Trinity College Dublin, World Vision Ireland, iyo World Vision Somalia. Magacyadayadu waa: ● Charles Zemp (Trinity College Dublin) ● Dr Frédérique Vallières (Trinity College Dublin) ● Dr Kristin Hadfield (Trinity College Dublin) ● Esperanza Escorza (World Vision Ireland) ● Laurene Barlet (World Vision Ireland) ● Maurice Sadlier (World Vision Ireland ● Abdinajib Hirsi (World Vision Somalia) ● Mzondi Ziba (World Vision Somalia) ● Mohamed Isse (World Vision Somalia) Shaqadeennu waa inaan daraasad ku samayno HEARTS si aan u fahamno sida uu u shaqeeyo iyo sida loo horumarin karo si uu si ka wanaagsan u shaqeeyo.
Waa maxay HEARTS?	**HEARTS** waa barnaamij cusub oo taageero caafimaadka maskaxda ah oo ku salaysan kooxo, kaas oo ka socda bulshada **Dangorayo**. HEARTS wuxuu ujeedkiisu yahay in uu taageero caafimaadka maskaxda ee xubnaha bulshada si waafaqsan diinta Islaamka, isagoo isku daraya dhaqamada Islaamka iyo qaybo ka mid ah wax-ka-qabashada cilmi-nafsiga. Habka HEARTS wuxuu ka koobnaan doonaa kulammo kooxeed (5–10 qof) oo dhacaya hal mar toddobaadkii muddo 5–6 toddobaad ah. Kulan kastaa wuxuu qaadan doonaa 1.5 ilaa 2 saacadood, waxaana hoggaamin doona laba qof oo tababaran oo ka socda bulshadaada, oo ay ku jiraan hoggaamiyeyaasha diinta.Kooxaha HEARTS waxay noqon doonaan kuwo loo kala saaray jinsiyad ahaan (rag iyo dumar si gooni ah).
Maxaa laygu martiqaaday inaan ka qayb galo?	Waxaa lagugu martiqaaday inaad ka qayb gasho daraasaddan sababtoo ah waxaad ka mid tahay bulshada **Dangorayo**, waxaana laga yaabaa inaad xiisaynayso ka qaybgalka **HEARTS** iyo inaad ka mid noqoto daraasadda adigoo noo sheegaya waayo-aragnimadaada HEARTS iyo sida uu kuu saameeyay. Waxaan oggolaansho ka haysannaa Guddiga Anshaxa ee Jaamacadda Trinity College Dublin iyo Wasaaradda

	Caafimaadka ee Puntland si aan u fulino daraasaddan. Tani waxay ka dhigan tahay in aan hubin doono in wax kasta oo aan ku weydiino ay kuu yihiin kuwo ammaan ah. Waxa aan cid kale la wadaagi doonin wax kasta oo aad noo sheegto, haddii aanan u malayn in adiga ama qof kale ay khatar ku jiraan.
Maxaan sameyn doonaa haddii aan ka qayb galo?	Halkan waxa ka dhici doona haddii aad go'aansato inaad ka qayb gasho daraasaddan cilmi-baarista: ● Ka hor inta aadan ka qaybgelin kulamada **HEARTS**, waxaad buuxin doontaa su'aalo ku saabsan caafimaadkaaga maskaxeed, fayo-qabkaaga, iyo iimaanka Islaamka. Su'aalahan waxay qaadan doonaan ugu badnaan 1 saac si loo dhammaystiro, waxaana buuxin kara adiga laftaada ama waxaa kaa caawin kara shaqaale tababaran oo ka socda **World Vision Somalia**. ● Ka dib marka aad ka qayb gasho kulamada **HEARTS**, waxaad mar kale buuxin doontaa isla su'aalihii, waxaana sidoo kale lagugu martiqaadi doonaa wareysi. ● Wareysigu wuxuu ku saabsan yahay waayo-aragnimadaada barnaamijka HEARTS, oo ay ku jiraan waxa aad ka heshay, waxa aadan ka helin, iyo sida aad u aragto in HEARTS loo horumarin karo. ● Wareysigu kama badnaan doono 1 saac, waxaana si fool-ka-fool ah u qaban doona shaqaale tababaran oo ka socda **World Vision Somalia**, meel gaar ah oo ammaan ah oo kugu habboon. ● Kulammada **HEARTS** mid kasta waxa kale oo uu ka koobnaan doonaa wada-hadallo kooxeed oo lagu ururinayo fikradahaaga ku saabsan kulanka, si aan u baranno sida loo horumarin karo kulankaas gaarka ah. Dadka hoggaaminaya HEARTS waxay qori doonaan qoraallo aan magac lahayn inta lagu jiro wada-hadalladan. Tani waxay ka dhigan tahay in magacaaga aan lala xiriirin doonin fikradaha aad bixiso, sidaas darteed qof kale oo aan ahayn hoggaamiyeyaasha kulanka ma ogaan doono waxa aad sheegtay. **Haddii aan duubno:**

	● **Cod –** Iyada oo qayb ka ah wareysiga, waxaa dhici karta in aan duubno codkaaga. Kaliya kooxda cilmi-baarista ayaa dhageysan doonta, waxaana tirtiri doonnaa duubista codka muddo hal bil gudahood ah.
Macluumaadkee iga (xogta gaarka ah) ayaa loo adeegsan doonaa daraasaddan?	Waxaan adeegsan doonnaa macluumaadka soo socda ee kugu saabsan: da'daada; jinsigaaga; heerarka aad adigu sheegato ee ku saabsan natiijooyin kala duwan oo la xiriira caafimaadka maskaxda iyo fayo-qabka nafsaaniga ah; heerarka aad adigu sheegato ee ku saabsan natiijooyin la xiriira iimaanka Islaamka; foomka oggolaanshaha; duubista codka wareysigaaga; iyo qoraalka (transcript) ee wareysigaaga.
Yaa heli doona macluumaadkayga?	Kaliya xubnaha kooxda cilmi-baarista (ee kor ku taxan) ayaa heli doona macluumaadkaaga.
Maxaa ku dhici doona macluumaadkayga?	Macluumaadka aad ku bixiso su'aalaha iyo wareysiyada si gaar ah ayaa loo ilaalin doonaa. Si loo ilaaliyo asturnaantaada, waxaa lagu siin doonaa lambar gaar ah oo kood ah. Magacaaga kama soo muuqan doono wax su'aalo ah ama qoraallada wareysiyada. Macluumaadkaaga si ammaan ah ayaa loo kaydin doonaa, waxaana heli doona oo keliya annaga (shakhsiyaadka ku taxan bilowga dukumentigan). Waxa kaliya ee ka reeban waa haddii aad la wadaagto macluumaad muujinaya in adiga ama qof kale uu ku jiro khatar. Macluumaadka aad bixiso waxaa loo isticmaali karaa maqaallo cilmiyeed iyo warbixino si dadka kale wax uga bartaan HEARTS. Si kastaba ha ahaatee, mar walba waxaa loo soo bandhigi doonaa si aan lagu aqoonsan karin qofka aad tahay.
Waa maxay sababta sharciga ah (legal basis) ee loo adeegsanayo macluumaadkayga?	Sababta sharciga ah ee loo farsameynayo xogta waa Qodobka 6(1)(e) iyo Qodobka 9(2)(j) ee GDPR. Waxaan kaliya u adeegsan doonnaa macluumaadkaaga mashruucan cilmi-baarista (iyo, haddii aad oggolaato, cilmi-baaris mustaqbalka la xiriirta mashruucan).
Maxay yihiin xuquuqdayda ee ku hoos jirta sharciga Ilaalinta Xogta?	Waxaad xaq u leedahay: ● Inaad diiddo isticmaalka xogtaada gaarka ah ama isticmaal kasta oo dheeraad ah; ● Inaad codsato gelitaanka xogtaada gaarka ah iyo inaad hesho nuqul ka mid ah;

	● Inaad codsato in xogta khaldan lagu saxo ama la tirtiro; ● Inaad codsato in la xaddido isticmaalka xogtaada gaarka ah; ● Inaad codsato in xogtaada gaarka ah la tirtiro. Sharciga awgiis, waxaad adeegsan kartaa xuquuqaha kor ku xusan ee la xiriir xogtaada gaarka ah, haddii aan codsigaagu ka dhigin mid aan suurtagal ahayn ama aad u adkeeya in cilmi-baarista la fuliyo. Tusaale ahaan, haddii daraasaddu ay ku dhowdahay in la daabaco, waxaa laga yaabaa in aanan awoodin in aan tirtirno xogta, maadaama ay saameyn ku yeelan karto natiijooyinka daraasadda. Si aad u isticmaasho xuquuqahan, waxaad la xiriiri kartaa Charles Zemp (zempc@tcd.ie), Abdinajib Hirsi (Abdinajib_Hirsi@wvi.org) ama Sarkaalka Ilaalinta Xogta ee Jaamacadda Trinity College Dublin (dataprotection.tcd.ie).
Ma loo adeegsan doonaa macluumaadkayga cilmi-baaris mustaqbalka?	Oggolaanshahaaga, waxaan jeclaan lahayn in aan xafidno macluumaadka laga ururiyo adiga si loo isticmaalo cilmi-baaris mustaqbalka la xiriirta **HEARTS**. Waxaad ka noqon kartaa oggolaanshahaaga isticmaalka mustaqbalka wakhti kasta.
Maxaan uga qayb galaa?	Macluumaadkaaga wuxuu naga caawin doonaa inaan baranno sida si ka wanaagsan loo taageero adiga, xubnaha kale ee bulshadaada, iyo sidoo kale xubnaha bulshooyinka kale ee Muslimiinta ah.
Ma beddeli karaa go'aankayga?	Haa, waad joojin kartaa wakhti kasta. Kaliya u sheeg qof ka tirsan kooxda **World Vision Somalia**. Qofna kama xanaaqi doono mana ku weydiin doono sababta. Haddii aad noo sheegto in aadan rabin inaad sii ka qayb qaadato, wareysiyada la duubay ama su'aalaha aad buuxisay waa laga tirtiri doonaa diiwaannada kooxda cilmi-baarista. Weli waxaad sii wadan kartaa ka qaybgalka kulamada **HEARTS**. Haddii aad u malaynayso in xogta (su'aalaha ama wareysiyada) ay khaldan tahay, fadlan kala hadal kooxda cilmi-baarista si loo saxo ama wax loogu daro.
Ma khasab baa inaan ka qayb galo?	Maya. Ma aha inaad ka mid noqoto haddii aadan rabin. Waa gebi ahaanba doorashadaada, mana ka xumaan doono haddii aad diido. Haddii aadan rabin inaad ka qayb gasho

	daraasadda, waa hagaag. Weli waxaad ka qayb geli kartaa kulamada **HEARTS**. Waxaa jira khatar yar oo ah in ka qaybgalka daraasaddan uu keeni karo raaxo-darro nafsi ah. Taageero caafimaadka maskaxda oo dibadda ah ayaa la heli doonaa haddii aad u baahato inaad isticmaasho.
Ma jiraan wax khataro ah oo ka dhalan kara ka qaybgalka?	Maya. Ma aha inaad ka mid noqoto haddii aadan rabin. Waa gebi ahaanba doorashadaada, mana ka xumaan doono haddii aad diido. Haddii aadan rabin inaad ka qayb gasho daraasadda, waa hagaag. Weli waxaad ka qayb geli kartaa kulamada **HEARTS**. Waxaa jira khatar yar oo ah in ka qaybgalka daraasaddan uu keeni karo raaxo-darro nafsi ah. Taageero caafimaadka maskaxda oo dibadda ah ayaa la heli doonaa haddii aad u baahato inaad isticmaasho.
Maxaan hadda sameeyaa?	Fadlan wixii su'aalo ah weydii kooxda **World Vision Somalia**. Haddii aad rabto inaad ka qayb gasho, fadlan saxiix foomka oggolaanshaha ee lagu siiyay, taasoo ka dhigan inaad oggolaatay ka qaybgalka daraasadda!
Su'aalo?	Waxaad nala soo xiriiri kartaa: Charles Zemp (zempc@tcd.ie) Esperanza Escorza (esperanza.escorza@worldvision.ie) Abdinajib Hirsi (Abdinajib_Hirsi@wvi.org) Mzondi Ziba (mzondi_ziba@wvi.org) Mohamed Abdi Isse(mohamed_isse@wvi.org)